# Dhibanayaasha Weerarka Galmada

## Xaquuqahaaga iyo illaha

**Warbixin muhiim ah ee loogu tallogalay dhibanayaasha raadinayo daryeelka caafimaadka ama dambi baarista caafimaad kadib weerarka galmada.**

## Baaritaanka caafimaadka dhaawacyada jirka

### Waa maxay xuquuqdeyda?

- Waxaad xaq u leedahay inaad diidid ama aqbashid qeyb walba ee baaritaanka waqti walba.
- Waxaad xaq u leedahay inuu dhaqtarka ama kaalisada ka jawaabo su'aalahaaga inta lagu jiro baaritaanka.
- Waxaad xaq u leedahay in u doode kula joogo inta lagu jiro baaritaanka, haddii la heli karo.

### Maxaa dhaco inta lagu jiro dambi baarista caafimaad?

- Dhaqtarka ama kaalisada waxay ku weydiinayaan su'aalo ku saabsan waxa dhacay inta lagu jiro weerarka galmada.
- Waxaa lagaa baarayaa madaxa illaa suulasha oo xanuun ama dhaawacyo ah.
- Tusaalooyinka waxaa laga aruurin karaa aagaga jirkaaga ee laga yaabo inuu leeyahay DNA-ga qofka ku dhibaateeyay. Muunooyinkaan waxaa la geliyaa xirmada baaritaanka weerarka galmada.
- Dhiiga iyo kaadida ayaa loo qaadi karaa ujeedada aqoonsiga daawo walba ee ku jira jirkaaga. (Daawooyinka qaar waxaa laga ogaan karaa illaa 5 maalmood.)
- Cadeynta dheeraadka ah, sida dharka, ayaa laga yaabaa in la qaado.
- Dhaqtarka ama kaalisada ayaa ka hadlayo halistaada uur lagu qaado, caabuqyada galmada laga qaado, iyo HIV ee weerarka galmada.
- Daawooyinka waxaa laguu siin karaa si looga hortago caabuqyada galmada laga qaado, HIV, iyo uurka.
- Haddii aad dhaawacantay inta lagu jiray weerarka, waxaad u baahan kartaa daryeelka caafimaadka oo dheeraad ah ee dhaafsan dambi baarista caafimaad.

**Ma jiro qof xaquuq u leh inuu ku taabto, ku qasbo, kuu hanjabo, ama kula yeesho xiriir galmo iyada oo aan jirin ogolaanshahaaga.**

**Xaalad kastaba ha jirtee, uma qalantid in galmo ahaan laguu weeraro.**

**Weerarka galmada kadib, waxaad dareemi kartaa caawin la'aan, kali ahaansho, naxdin, xanaaq, cabsi, niyad jab, walwal, xishood ama ceeb.**

**Weerarka galmada waa dhacdo naxdin leh; qof walba wuxuu uga falceliyaa qaab ka duwan oo dareemaa dareemo kala duwan.**

**Inaad doorato helidda dambi baarista caafimaad kadib weerarka galmada waxay ku saabsantahay caafimaadkaaga iyo badqabka.**

## Baaritaanka xirmada baaritaanka weerarka galmada

### Waxa aad u baahantahay inaad ogaatid

- Xirmada waxaa kaliya oo la baarayaa haddii aad go'aansatid inaad u soo sheegtid dambiga fullinta sharciga.
- Xirmada waxaa kaliya oo la baarayaa haddii aad bixisid ogolaanshaha lagu baarayo. Markii ay midaan dhacdo, xirmada waxaa loo yaqaanaa “**xirmada aan xadidneyn**,” oo loola jeedo inaadan gelinin xadeynta lagu baarayo.
- Isbitaalka kuma sameeyo wax baaritaano ah cadeynta la aruuriyay.

## Adiga ayaa go'aansanaya in la baarayo xirmada

- **Waxaan rabaa in xirmada la baaro.**
  Haddii aad rabtid in xirmada la baaro, ogeysii kaalisada ama dhaqtarka sameynayo baaritaanka. Waxaa lagu weydiinayaa inaad saxiixdid *Foomka Ogolaanshaha Keydinta Cadeynta Weerarka Galmada iyo Baaritaanka* oo bixiyo ogolaanshaha xirmada lagu baaro.

  Sida ka qeyb ah nidaamkaan, waxaa sidoo kale lagu weydiinayaa inaad saxiixdid foomka siideynta warbixinta si markaas warbixinta isbitaalka uu kaa aruuriyay loola wadaago fullinta sharciga. Markii midaan ay dhacdo, xirmada waxaa loo yaqaan **”xirmada aan xadidneyn,”** oo loola jeedo inaad ogolaansho siisay si loogu diro baaritaanka sheybaarka dhaawacyada jirka.

- **Ma rabo in xirmada la baaro.**
  Haddii aadan rabin in xirmada la baaro, ogeysii kaalisada ama dhaqtarka sameynayo baaritaanka. Foomka Ogolaanshaha Keydinta Cadeynta Weerarka Galmada iyo Baaritaanka, waxaa lagu qorayaa inaadan bixin ogolaanshaha lagu baarayo xirmada. Markii ay midaan dhacdo, xirmada waxaa loo yaqaanaa “**xirmada xadidan**,” oo loola jeedo inaad gelisay xadeynta lagu baarayo. Xirmooyinka la xadiday waxaa la keydinayaa ugu yaraan 30 bilood.

## Ka waran haddii aan maankeyga badelo ee ku saabsan in xirmada la baaro?

- Haddii wargelin horaan loogu sameeyay fullinta sharciga, la xiriir wakaaladaas oo u sheeg inaadan rabin in xirmada la baaro. Haddii xirmada aanan weli la baarin, waad ka laaban kartaa ogolaanshahaaga ee lagu baarayo. Meeshaas markii ay joogto waxaa loo tixgelinayaa inay “xadidantahay.”
- Haddii aadan weli ku sameynin wargelin fullinta sharciga, la xiriir wakaalada oo u sheeg inaad rabtid inaad wargelin sameysid. Sharax inaad horaan u yeelatay dambi baarista caafimaad oo aad rabtid in xirmada la baaro.

### Raadraaca-Nidaamka-Xirmada (Track-Kit System)

Bixiyaha caafimaadka ee sameynayo baaritaanka wuxuu siiyaa dhibanayaasha warbixin ku saabsan nidaamka raadraaca xirmada iyo sida loo galo. Dhibanayaasha waxay geli karaan Raadraaca-Xirmada (Track-Kit) xili walba si ay u fiiriyaan goobta iyo heerka baaritaanka xirmada weerarka galmada.

# Wargelinta fullinta sharciga

## Ma inaan wargeliyaa fullinta sharciga?

- Dhibanaha weerarka galmada looma baahno inuu ku soo wargeliyo dambiga fullinta sharciga.

## Sidee ayaan ugu sameeyaa wargelin fullinta sharciga?

- Waxaad ku sameynta kartaa wargelinta adiga oo soo wacayo wakaalada fullinta sharciga ee ku jirto maamulka meesha dambiga ka dhacay. Dhaqtarka ama kaalisada kugu caawinayo baaritaanka ayaa sharaxi karo sida midaas loo sameeyo.
- Haddii aad ku sameysid wargelin wakaalad kaloo fullinta sharciga ah, waxay u gudbinayaan warbixinta wakaalada saxda ah si ay u baaraan.
- Dhibanaha ayaa u soo wargelin karo dambiga qaabka saxda ah ama sugo illaa hadhowdii, si kastaba, sugitaanka soo wargelinta aad ayay u adkeyn kartaa baaritaanka iyo xukunka.

U doodaha weerarka galmada ayaa ku siin karo warbixin badan ee ku saabsan ku soo wargelinta fullinta sharciga.

## Sidee ayaan u ogaadaa waxa ku dhacay xirmadeyda baaritaanka weerarka galmada?

**Dhibanaha weerarka galmada wuu raadraaci karaa goobta iyo heerka xirmadooda iyaga oo u marayo nidaamka raadraaca gobolka oo dhan ee loo yaqaan Track-Kit:**

- Adeeg bixiyaha caafimaadka ayaa ku siinayo warbixin ku saabsan helida gelitaan gaar ah ee Track-Kit iyo Aqoonsiga gaarka ah ee ku xiran xirmadaada.
- Nidaamka Track-Kit wuxuu dabagalaa labadaba xirmooyinka xadidan iyo kuwa aan xadidneyn.

**Dhibanaha weerarka galmada ee ku soo wargeliyay weerarka fullinta sharciga ayaa si toos ah uga codsan karo warbixinta wakaalada, oo ay ku jiraan:**

- Taariiqda xirmada loo gudbiyay sheybaarka baaritaanka dhaawacyada jirka.
- Taariiqda natiijooyinka la helay.
- Haddii bogga DNA-ga la helay ama aan la helin.

## Qarashka baaritaanka

### Yaa bixinayo lacagaha dambi baarista caafimaad?

- Sida uu dhigayo sharciga Minnesota, gobolka ayaa masuul ka ah kharashka uruurinta caddeynta inta lagu jiro baaritaanka caafimaadka. Gobolka ayaa bixinaya oo looma eegayo haddii loo sheegay ama aan loo sheegin booliska.

### Miyuu caymiskeyga helayaa biilka dambi baarista caafimaad?

- Isbitaalku waxa keliya oo uu lacagta ku dallici karaa ceymiska haddii qofku u oggolaado. Haddii isbitaalku biilasha ku dallacayo ama uusan ku dallacayn ceymiska qofka ayey jirtaa.

### Yaa bixiyo qarashka daryeelka caafimaadka kale?

- Adiga ayaa masuul ka ah qarashaadka daryeelka kale ee caafimaadka uu siiyay isbitaalka, oo ay ku jiraan daaweynta dhaawacyada iyo daawooyinka.
- Isbitaalka ayaa u soo dirayo adiga ama caymiskaaga qarashaadkaan daryeelka caafimaadka kale. Haddii aadan rabin in caymiskaaga kuu soo diro daaweyntaan caafimaad, fadlan la hadal xafiiska isbitaalka kuu soo dirayo.
- Isbitaalada waxay leeyihiin daryeel samafal iyo barnaamijyada kaalmada dhaqaalaha ee la heli karo haddii aad caawin uga baahantahay qarashaadkaaga caafimaadka.
- Haddii aad danbiga u sheegtay booliiska, waxaad kaalmo ah biilasha isbitaalka ka codsan kartaa Minnesota Crime Victims Reimbursement Program (Barnaamijka Lacagcelinta Dhibbanaha Danbiga ee Minnesota).
- U doodayaasha ka socdo barnaamijka u doodistaada weerarka galmada ayaa kugu caawin karo su'aalaha iyo walaacyada lacag bixinta baaritaanka.

## Haddii aad u baqeysid badqabkaaga

- Haddii aad u baqeysid badqabkaaga ama aad ka baqeysid xiriirka qofka ku dhibaateeyay, waxaad ka raadin kartaa **amarka illaalada** rayidka ee maxkamada. Garsooraha ayaa ku amri karo eedeysanaha inuusan kula soo xiriirin oo uu kaa fogaado.
- Waxaa jiro labo nooc oo amarada illaalada rayidka: **Amarka Illaalada** iyo **Amarka Xakameynta Dhibaateynta**. Nooca amarka ee adiga kugu haboon waxay ku xirantahay nooca xiriirka aad la leedahay qofka ku dhibaateeyay iyo nooca rabshada ama dhibeeteynta dhacday. Waxaad ku xareyn kartaa codsi amaradaan ah si bilaash ah.
- Kala xiriir barnaamijka u doodistaada weerarka galmada ama maxkamada deegaankaaga wixii warbixin ah ee sida loo helo **amarka illaalada.**
- Haddii qofka ku dhibaateeyay la xiray, waxaad ka ogaan kartaa goorta qofka ka soo baxayo xabsiga adiga oo adeegsanayo adeega VINE ee (877) 664-8463 ama booqo [www.vinelink.com](http://www.vinelink.com). Barnaamijka u doodistaada weerarka galmada ayaa kugu caawin karo inaad heshid warbixin badan ee ku saabsan dacwada dambiga.

## Kaalmada dhaqaalaha (Magdhowga)

- Dhibanayaasha weerarka galmada ee ku soo wargeliyay fullinta sharciga ayaa ka codsan karo kaalmada dhaqaalaha Guddiga Magdhowga Dhibanayaasha Dambiga Minnesota haddii ay la dhibaatoodeen qasaaraha dhaqaalaha sida ay sababtay dambiga.
- Guddiga Magdhowga Dhibanayaasha Dambiga ayaa bixin karo qarashaadka sida adeegyada la talinta, mushaaraadka qasaaray, iyo qarashaadka caafimaadka, oo ay ku jiraan qoraalada daawada.
- Foomamka iyo warbixinta waxaa laga heli karaa Xafiiska Barnaamijyada Cadaalada Minnesota ee (651) 201-7300 ama 1(888) 622-8799 ama onleenka [ojp.dps.mn.gov](http://ojp.dps.mn.gov) (ka hooseeyo “Help for Crime Victims”).

## Qeexitaanada

**Weerarka Galmada**

Xiriirka galmada ama hab dhaqanka ee ku dhacda ogolaansho la'aanta dhibanaha. Qaababka qaar ee weerarka galmada waxaa ku jiro: kufsiga la isku dayay, taabashada galmada aan la rabin, ama ku qasbida qofka inuu sameeyo waxyaabaha galmada ee aysan rabin inay sameeyaan.

**Dambi baarista caafimaad**

Baaritaanka uu sameeyo kaalisada ama dhaqtarka dhibanaha ee xigay weerarka galmada. Xirmada baaritaanka weerarka galmada: Cadeynta la aruuriyay ee laga yaabo inay wadato DNA-ga ka imaado qofka ku dhibaateeyay, oo ay ku jiraan suufafka iyo muunooyinka kale ee la xiriiro weerarka galmada.

**Xirmada aan xadidneyn**

Xirmada baaritaanka weerarka galmada ee dhibanaha ku soo wargeliyay dambiga fullinta sharciga oo ogolaaday in la baaro xirmada.

**Xirmada xadidan**

Xirmada baaritaanka weerarka galmada ee dhibanaha uusan ogolaan in la baaro xirmada.

**Baaritaanka xirmada**

Markii sheybaarka dhaawacyada jirka ay baaraan cadeynta ku jirto xirmada baaritaanka weerarka galmada si loo go'aansado haddii DNA ka yimid qofka aan ka aheyn dhibanaha uu jiro.

**Foomka Ogolaanshaha Keydinta Cadeynta Weerarka Galmada iyo Baaritaanka**

Foomka oo ay saxiixaan dhibanayaasha ee muujiya haddii ay rabaan in xirmadooda baaritaanka weerarka galmada la baaro ama aan la baarin.

**U doodaha**

Qofka shaqadiisa kaliya ay tahay caawinta iyo taageerada dhibanaha. Ma ahan shaqaalaha isbitaalka oo kuma xirno fullinta sharciga. Maxaad ku leedahay u doodaha inuusan la wadaagin qof kale ogolaanshahaaga la'aantiisa.

**Minnesota Crime Victims Reimbursement Program**

Barnaamijka uu maamulo gobolka siiyaa kaalmada dhaqaalaha dhibanayaasha weerarka galmada iyo dambiyada kale ee rabshada.

**Fullinta sharciga**

Waaxda booliska ama xafiiska sherifka ee leh masuuliyada lagu baarayo maadaama goobta dambiga uu ka dhacay ay hoos timaadoo.

## Caawinta waa la Heli karaa

- Adeegyada waxaa lagaaga heli karaa si bilaash ah barnaamijka u doodistaada weerarka galmada, oo ay ku jiraan qadadka 24-ka saac, waxqabadka masiibooyinka, kooxyada taageerada iyo u doodista.
- U doode ka socda barnaamijka u doodista weerarka galmada ayaa:
  - Kaa caawin kara inaad si qoto dheer u fahanto mawduucyada ku qeexan buug-yarahaan.
  - Kaa caawin kara fahamka sida falcelinadaada dareenka iyo jirka ay u yihiin jawaab caadi ah.
  - Dhageysan kara dareemahaaga iyo walaacyada.
  - Kugu caawin kara fahamka iyo miisaaminta dooqyadaada.
  - Kuu sharaxi kara nidaamka sharciga haddii aad tixgelineysid inaad soo wargelisid dambiga.
  - Kuula xiriiri karaa dadka kale asaga oo ku matalaya ogolaanshaaga kadib.
- Barnaamijyada u doodista weerarka galmada ayaa si sharci ah oo anshax ahaan ah looga baahanyahay inay illaaliyaan qarsoodigaaga. Xaquuqahaaga ku aadan qarsoodiga waa laguu sharaxayaa markii aad adeegyo raadsatid.

## Caawin helida

### Hel qadadka masiibooyinka weerarka galmada deegaanka oo 24-saacadood ah:

www.rapehelpmn.com

### Wixii u gudbinta weerarka galmada, rabshada qoyska, iyo adeegyada ka ganacsiga aadanaha:

Minnesota Day One Line

Soo wac: (866) 223-1111

Fariin qoraalka: (612) 399-9995

www.dayoneservice.org

### Wixii u gudbinta adeegyada deegaanka kale:

United Way 211 waxay bixisaa warbixin iyo gudbin 24-saac ah

Soo wac: 211 ama (800) 543-7709

### Wixii warbixin ee u qalmida magdhowga dhaqaalaha iyo foomamka:

Minnesota Crime Victims Reimbursement Program

(651) 201-7300 ama (888) 622-8799

ojp.dps.mn.gov

### Si aad u codsatid in lagu soo ogeysiiyo ka siideynta maxbuuska xabsiga ama inaad heshid warbixin kaloo haynta ah:

Warbixinta Dhibanaha iyo Ogeysiinta Maalin walba ee Minn. (VINE)

(877) MN4-VINE ama (877) 664-8463

www.vinelink.com

### Barnaamijka Qarsoodiga ee Cinwaanka Ku Badqabidda

(866) 723-3035

www.sos.state.mn.us

### Isbaheysiga Minnesota ee La Dagaalama Weerarka Galmada

Xaanshida xaqiiqaha iyo illaha waxbarashada: www.mncasa.org

### Haddii aad tahay dhibane dambi ama marqaati oo aad aaminsantahay xaquuqahaaga in lagu xadgudbay:

Qeybta Cadaalada Dhibanaha Dambiga (Crime Victim Justice Unit)

(651) 201-7310 ama (800) 247-0390

**Hospital Notice to Sexual Assault Victims - Somali**

Ogeysiintaan waxaa lagu hormariyay iskaashiga Waaxda Badqabka Dadweynaha, Isbaheysiga Minnesota ee La Dagaalama Weerarka Galmada, iyo Ururka Isbitaalka Minnesota.

Dib loo eegay 12-23